

U DIYAARINTA
GUUL KA
KEENIDA
WAXBARASHADA
CARRUURTA
YARYAR:
TILMAAMAHA
QOYSKA



- Akhriska
- Qoritaanka
- Xisaabta
- Sayniska
- Cilmiga Bulshada

WAXBARIDA
CARRUURTA AAN XILLIGII
DUGSIGA GAARIN

Manhajka qiyaasan ee hadda,
Aqoon aan weligaa kaa harin



Qoyska Qaaligow,

Markaad bilawdo ka fekerka sidii aad ilmahaaga ugu diyaarin lahayd inuu guul ka keeno dugsiga, waxbarashada ilmaha intaan la geyn iskuulka ayaa ku siin karta sawir la xiriira waxa ilmuhu ay tahay inuu khibrad u sii yeesho intaanu bilaabin iskuulka. Buugan yar waxaad ka heli doontaa tusayaal ama tilmaamayaal iyo falal aad u isticmaali karto waxyaabaha qoyska joogtada u sameeyo oo ku kaalmayn karta ilmahaaga intaanu bilaabin dugsiga.

Tilmaamahani wuxuu ku salaysan yahay heerka cusub oo waxbarasho ee Ohio oo gacan ka siiya waalidka iyo dadka kale ee la shaqeeya carruurta aan weli gaarin da'dii dugsiga si ay u fahmaan waxay tahay da'yarta waxbaranaysaa inay ogaato oo ay tahay inay sameeyaan sida akhriska, qoritaanka, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada. Ohio waxay hadda leedahay heer loo dhigay waxa la filayo in la Sameey laga bilaabo sannadaha dugsiga bilawga ka horeeya ilaa fasalka laba iyo tobnaad.

Waa muhiim in la garto in waxyaabaha ku jira buugani ayna ahayn dhamaan heerkii waxbarasho ee la rabay; hase yeeshee, qoraalkan waxa loo dhigay hab ah in uu muujiyo dhawr xirfadood oo ku kaalmayn kara in ilmaahaagu guul ka keeno waxbarashada dugsiga.

Si aad u aragto heerka waxbarashada laga filaayo ilmaha oo dhamaystiran, laga bilaabo waxbarashada ka horraysa dugsiga ilaa iyo fasalka laba iyo tobnaad, booqo bogga internetka ee Wasaarada Waxbarashada ee gobolka Ohio oo ah **[www. OhioAcademicStandards.com](http://www.OhioAcademicStandards.com)**.

Waxaan idiinku mahadinayaa si qalbi furnaani ku jirto waqtiga, xiisaha iyo dedaalka aad gelinaysaan waxbarashada carruurtiina. Waxaan rajaynayaa in buugani uu noqdo mid ka mid ah waxyaabaha badan oo aad u isticmaasaan sidii ilmihiiinu guul ugala soo hoyan lahaa fasalka dhexdiisa iyo dibediisaba.

Nabadgelyo,



Susan Tave Zelman
Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha

Qoyska Qaaligow,

Socdaalka waxbarashada loo galaa wuxu bilaamaa maalinta ilmahaagu dhasho. Sanadaha hore ee aanu da'da dugsigaa caadiga gaarin waa xilli koritaan oo aad loo dareemi karo oo isbedelna le, waana xilliga la dhigo aasaaska guusha iskuulka.

Maadaama aad tahay macalinka koowaad ee ilmaha, door aad u weyn baad ka ciyaartaa sannadahan hore. Si gacan laguugu siiyo, Laanta Waxbarashada ee Ohio waxay isugu kaa dubariday heer waxbarasho oo aad raaci karto, oo loogu talagalay carruurta aan gaarin gelitaanka iskuulka caadiga ha, oo isugu jira luqada dhigideeda, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada.

Heerkan ilmaha laga filayo waa oraaho sharaxaya aqoonta iyo xirfadaha ay tahay in da'da yari ay barato, iyadoo dad ka weyni hagayaan, intaanay dugsigaa bilaabin. Iyadoo baaritaan lagu gaaray tan, heerkan la iska rabo waxay u adeegaayaan asal ahaan in ay ka abuuraan khibrad waxbarasho oo hore oo macna samaysa dhamaan goobaha ilmaha wax lagu baro intaanay da'da iskuulka gaarin, goobaha xannaanada carruurta iyo gurigaba. Heerka aqoomeed oo loo dejiyey xilliga dugsigaa aan la gaarini waxay la socotaa heerka loo dejiyey dugsigaa carruurta ee Ohio kaasoo gacan ku siinaysa macalimiinta, carruurta iyo qoysku inay fahmaan waxa laga bilaayo iskuulka carruurta.

Laanta Waxbarashada ee Ohio iyo Laanta Ohio ee Shaqada iyo Adeega Qoyska ayaa si wadajir u wada shaqaynaya si ay u wargeliyaan qoysaska haysta carruurta aan weli da'dii iskuulka gaarin doorka muhiimka ah oo ay ka ciyaaraan waxbarashada bilawga ah ee carruurtooda iyo inay siiyaan ilo ka kaalmaynaya hawlahooda. Buugan yar waxa ku dhex jira tusaalooyin ah talasiin iyo falal kaa kaalmaynaya markaad la ciyaarayso ama wax la qabanayso ilmahaaga. Uma baahnid tababar gaar ah iyo waxyaaba badan si aad falalkaa u samayso — ku dar uun waxyaabaha aad hore u wada samaynayseen adiga iyo ilmahaagu maalin kasta.

Anagoo metelayna Laanta Waxbarashada ee Ohio iyo Laanta Shaqada iyo Adeega Qoyska ee Ohio, waxaanu idiinka mahad celinaynaa joogtaynta sida aad ula dhacsantihiiin oo aad u taageersantihiiin kor u qaadida waxbarashada iyo hormarka ubadkiina.

Nabadgelyo,



Sandra M. Miller, *Agaasime*
Xafiiska Waxbarashada Hore ee Carruurta
Laanta Waxbarashada ee Ohio



Terrie Hare, *Madaxa*
Faraca Xannaanada Ubadka
iyo Hormarinta
Xafiiska Carruurta iyo Qoyska
Laanta Shaqada iyo Adeega
Qoyska



Carruurta bilawda dugsiga iyagoo yaqaana eraya badan oo kala duwan, la wadi kara sheekada carruuraha kale iyo kuwa qaangaarka, sheeka wadaag la noqon kara oo waydiin kara su'aalo, si wanaagsan bay ugu diyaarsan yihiin inay bartaan akhriska iyo qorida. Xilliga waxbarashada intaan dugsiga ilmaha la geyn, waxa ubadka la baraa sidii ay erayo dhawaaqoodu kala duwan yahay u samayn lahaayeen iyagoo dhegaysanaya sheekooyinka loo akhriyo, ku luuqaynaya laxanka heesaha maaweelada ama ku madadaalanaya ciyaaaraha erayada lagu saleeyo. Marka da' yartu maqasho bawaag sare loogu akhriyayo, waxay bartaan sida wax loo dhegaysto, sida looga waramo sheekada oo waxay kaloo erayaday hore u yiqiineen ku darsadaan kuwa cusub.

Waalidka iyo macalimiinta waxbarashada dugsiga ilmuhu intuu yaryahay la geeyo waxay ku garab siiyaan carruurta siday u noqon lahaayeen kuwa karti iyo kalsooni akhris iyo qorid le iyagoo u akhriyaya ama la akhriyaya iyo inay siiyaan waxyaabaha ay u baahan yihiin sidii ay qoraal iyo akhris u samayn lahaayeen. Iyagoo gacantooda wax ku samaya waxay da'da yar tustaa xiisaha iyo awooda ay leedahay in si fiican waxna loo akhriyo oo wax loo qoro.



Kasida Codaynta, Garashada Erayga iyo fasiixnimada

Tan waxaa looga jeedaa: *Karida in si hufan loo akhriyo iyagoo erayada lagu dhawaaqayo, garashada erayga qoran iyo ugu dhawaaqida erayada si fudud.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Akhriyi karaan magacooda hore iyo kan dambe.
- Gartaan oo dhahaan xarfaha waaweyn qarkood(A, B, C) iyo kuwa yaryarka ah(a, b, c).
- Gartaan xarfaha ku jira magacooda koowaad.

Tijaabi fahamkaaga: Xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar

Waaweynka: ABCDEFGHIJKLMNOPQRSTUVWXYZ

Yaryarka: abcdefghijklmnopqrstuvwxyz



- Gartaan in xarfaha loo isticmaalo sidii eray loo samayn lahaa, sida b-i-s-a-d, e-y[d-o-g].
- Karaan in ay markay arkaaba akhriyi karaan erayada caanka ah sida STOP[ISTAAG] oo ku taala boorarka istaagida tilmaama.
- Gartaan codadka gaarka ah oo ay leeyihiin sheekooyinka, gabayada iyo heesaha caanka ahi.
- Gartaan marka erayadu dhawaaq isku mida ka bilaamayaan sida “bat” iyo “bird”[soomaali ahaan buur iyo buug]
- Sheegi karaan tirada shaqlanayaasha[qaybaha erayga] ee ku jira iyagoo gacmaha isku garaacaya ama suuldhabaalaynaya[faraha isku dhifanaya]

Tijaabi fahamkaaga: **Shaqlanayaasha**



Ereyada le hal shaqlane:	Bat, dog, helo, it, run, book Tusaale Soomaali ah wuxu noqon karaa Rah, dah, hadh, lax, bax, loox
Ereyada le labada shaqlane:	Apple(ap-ple), baseball(base-ball), water(wa-ter), paper(pa-per), Tusaale Soomaali ah wuxu noqon karaa: urur(ur-ur), barayaal(bara-yaal), Biyo(bi-yo), waraaq(war-aaq)
Ereyada le saddexda shaqlane:	Octopus(oc-to-pus), calendar(ca-en-dar), ladybug(la-dy-bug), telephone(tel-e-phone) Tuusaale Soomali ah: Dharbaaxo(dhar-baa-xo), tusaale(tu-saa-le), talagal(ta-la-gal), labajir(la-ba-jir).



Kororsiga Erayada

Tan waxaa looga jeedaa: *Karitaanka akhriska erayada cusub iyadoo tilmaamayaasha sheekada la adeegsanayo, su'aala weydiinta, dhegaysiga iyo la hadalka dadka waaweyn iyo asxaabta*

Waxay carruurto gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsigaa caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Isticmaalaan tasaawiirta si ay u bartaan eraya cusub.
- Gartaan erayada, calaamadaha iyo tilmaamaha nolosha maalin walba joogtada ka ah sida erayga “SCHOOL” ee basaska ku qoran, calaamadaha jidadka ee wadada dhinacyadeeda ka muuqda sida “deer crossing”[ugaartu meelahay ka gudbaan caalamada lagu qoro] iyo “park signs” [calaamadaha tilmaamaya meelaha gaariga la dhigan karo] ama erayga “EXIT”[BIXID] oo laga heli karo meelaha ay dukaamadu ka mid yihiin.
- Isticmaalka erayada iyo inay u kala bixin karaan sida guud oo ay isu hoos galaan marka la weydiiyo sida erayada midabka[buluu, casaan], erayada cuntada[tufaax, biise], iyo erayada jihooyinka[kor, hoos].



Hannaanka Akhriska - Fekradaha daabacistaanka, tabta fahamka iyo isqiyaaska

Tan waxaa looga jeedaa: Carruurto waxay bartaan fekradaha aasaaska ah iyo macnayaasha waxyaabaha kala duwan ee la daabaco sida buugta sheekooyinka, buugta raadraaca qoraalka, qoraalada wax karinta laga barto, iyo kaararka la isu diro.

Waxay carruurto gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsigaa caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Fahmaan in waxa daabacani macna sameeyo iyagoo sheeko dib u soo celinaya ama war bixinaya la xiriira daabacistaanka.
- Buug sare u qabsan karaan, u rogaan bogaga hore iyo dib iyagoo muujinaya inay erayada u akhriyaan bidix illaa midig. Kala gartaan faraqa u dhexeeya erayada qoran iyo tasaawiirta.
- Masawiro ku isticmaalaan si ay u tilmaamaan hannaanka dhacdooyinkii ku jiray sheekadii loo akhriyey.
- Kari karo inuu su'aala ka keeni karo ama ka jawaabi karo wixii loo akhriyey.
- Tilmaami karo bawaagta kuwuu jecel yahay ama ka helo.
- Saadaalin karo(waxa ku xiga) siday u socoto sheekada loo akhriyayo.



Akhriska Noocyadiisa - Warsiin, Farsamo iyo Qancin qoraala ah

Tan waxaa looga jeedaa: Akhrinta, fahamka, sharixida iyo ka falcelinta la xiriira waxyaabaha qoran ee kala duwan sida bawaagta sheekooyinka, wargeysyada, buugta sayniska, maababka(khariidada) iyo bogaga shabakadaha kunbiyuutarka.

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsiiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Isticmaalaan sawirada si ay fahamkooda sheekada ama warka wax uga tarto.

Tijaabi fahamkaaga: Isticmaalida sawirada si loo fahmo wixii la akhriyey



La sawir taswiir ilmahaaga oo midkiiba mar ha sheego sheeko ku saabsan taswiirta.

- Sheegaan waxay sheekadu ku saabsan tahay.
- Raacaan tilmaama fudud.



Noocyada Akhriska - Qoraalada Suugaanta

Tan waxaa looga jeedaa: Inuu awoodo akhrinta sheekooyinka, gabayada, sheeka-baralayda, sheekada gaaban iyo riwaayadaha. Sharaxo macnaha waxa la akhriyey, magcaabo jilayaasha muhiimka ah, fahmo halka iyo xilliga sheekadu ay ka dhacday iyo inuu malayn karo waxa soo socda sheekada dhexdeeda iyadoo laga tixraacayo wixii la akhriyey.

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsiiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Tilmaamaan jilayaasha sheekooyinka ay ka helaan[jecelyihiin].
- Dib u sheegaan ama u jilaan sheekadii loo akhriyey.

Tijaabi fahamkaaga: Xusuusashada wixii la maqlay



Sheeko u akhri ilmahaaga, weydii markaa in ilmuhu dib kuugu sheego sheekada. Ma karayaa in uu dhacdooyinkii muhiimka ahaa ee sheekada kuu sheego? Ma fahmay sheekada?

- Bilaabaan fahamka faraqa u dhexeeya khayaaliga iyo dhabta.



Nidaamka Qoritaanka

Tan waxaa looga jeedaa: Isticmaalka talaabooyinka qoritaanka ka hor la maro (Qorshaynta, helida fekrada), qorid bilawga (isku dayga hore), iyo dib ugu noqoshada iyo hagaajinta qoraalka si looga gaaro qoraalka ugu dambeeya

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- La yimaadaan fekrada qoraal iyagoo la hadlaya dadka kale.
- Inay bilaabaan sheegida sababta ay wax u qorayaan sida qoritaanka martiqaadka xusaska dhalashada, ama qoraal ayeeyo loogu mahadcelinayo ama qoraal macalin ku aadan.
- Sharixitaanka fekradaha iyagoo u sheegaya waalidka ama macalinka si uu markaa u qoro.
- Bilaabaan isticmaalka liisaska erayada fudud lagu qoro ama ay macalinka. Kaalmadiisa si ay fekradaha qoraal ugu bedelaan.
- La wadaagaan qoraalada iyo tasaawiirta qaarkooda dadka kale.



Noocyada Qoraalka

Tan waxaa looga jeedaa: Barashada, doorashada iyo u isticmaalida erayada qoraalka kala duwan sida qoritaanka waraaqaha, curisyada iyo sheekooyinka. Baro sida akhristayaal kala duwan wax loogu qoro.

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay qoraan sheekooyin sahlan iyagoo isticmaalaya tasaawiir, xarfaha calaamadaha u taagan, ama xarruufka laftooda.

- Magcaabaan oo caalamadiyaan walxaha caanka ah[iyagoo qof weyn gacan ka helaya].
- Tusaan waxay ka yaqaaniin qoraalka iyagoo ka bilaabaya xagga sare ee boga oo ku feegaaraya ama u “qoraya” si gudub ah iyagoo u wada bidix ilaa midig iyo kor ilaa hoos.



Shardiga Qoraalka

Tan waxaa looga jeedaa: *Fahamka iyo isticmaalka xarakaynta, naxwaha iyo sharciyada higaada[sida in weer kasta lagu bilaabo xaraf weyn, laguna dhamaystiro calaamada joogsiga ama waydiinta.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Qori karaan xarfaha magacooda iyo xarfaha laysla wada yaqaan[sida: erayada midabada, magacyada xayawaanka, erayada carruurta xiisayso], iyagoo qof ka weyni gacan siinayo.
- Isku deyi karaan qorintaanka erayada caanka ah iyagoo isticmaalaya calaamadaha xarfaha ka dhigan ama xurruufta laftigooda.
- Bilaabaan ogaashaha in xarfaha la isku daro si eray loo sameeyo sida b-i-s-a-d inay tahay bisad, iyo in erayada meesha banaani u dhexayso ee la israaciyo ay ka dhigan yihiin weer ama jumlad[sida: Bisada naaxday].



Baaritaanka

Tan waxaa looga jeedaa: *Garashada sida warka loogu ururiyo dhamaan maadooyinka iskuulka iyagoo la isticmaalayo bawaagta, kunbuyuutarayada, wargeysyada iyo ilaha kale. Uga waranto waxaad ogaatay si qoraal iyo hadalba.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'adii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Weydiiyaan su'aala la xiriira iskuulka waxa ka socda iyo waxyaabaha ay ka helaan.

- U isticmaalaan wax fiirida ama eegida iyo bawaagtaba si ay u bartaan wax cusub oo ay kala hadlaan dadka kale.
- Xusuustaan wararkii uga siyaaday waxyaabaha cusub oo la wadaagaan inta kale.



Xiriirka: Cod iyo Muuqaal

Tan waxaa looga jeedaa: *Kala hadalka dadka kale mawduucyo kala duwan.*

Waxay carruurto gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay dhegaystaan dadka hadlaya, sheekooyinka, iyo gabayga.
- Inay raaci karaan tilmaamaha fudud ee afka looga sheego.

Tijaabi fahamkaaga: *Dabaqida tilmaamaha fudud ee la is faro*



Ku kaalmee in ilmahaagu bartaan inay raacaan tilmaamaha fudud ee ciyaaraha loo dejiyo, sida “Simon Says.” Tusaale ahaan, Simon baa yiri, “Taabo madaxaaga” Simon baa yiri. “Taabo suulasha. Haddana taabo ruugaaga.” Haddii ilmuhu taabto ruugiisa waa hal door oo dhicida waayo ma aad oran “Simon baa yiri.” U ogolow in ilmahaagu ciyaaro ciyaarta Simon oo adiga ku siiyo amarada.

- Inay u hadlaan si cad oo la fahmi karo.
- Ka waramaan waxa soo mara iyo waxay sameeyaan.
- Ku darsami karaan dadka kale oo la jiihin karaan gabayga, heesaha maaweelada iyo in ay la qaadaan heesaha.

Tusayaal

iyo Falal



- ✔ Kor wax ugu akhri carruurtaada maalin kasta. Waqti u qoondee sida qadada ka hor ama ka dib ama intaan la seexan ka hor.
- ✔ Markaad waxa u akhriyayso:
 - U ogolow inuu ilmuhu buugga qabto oo boggagga rogrogo.
 - Farta la raac xarfaha aad u akhriyayso.
 - Tusi oo kala hadal sawirada iyo erayada is le iyagu.
 - Yara hako markaad wax u akhriyayso oo weydii ilmaha waxay la tahay inay dhici doonto.
 - Ku dhiiri geli inay su'aala kaa weydiiso waxa loo akhriyayo.
 - Kala hadal erayga ku cusub ilmahaaga.
 - Gebagebada sheekada, ka hadal ilmahaagu qaybaha uu aad uga helay.
- ✔ U akhri ilmahaaga hees-carruureeda, sida “Brown bear, brown bear, what do you see? I see a black cat looking at me[heesaha carruurta oo Soomaliga ah oo la midka ayaad ku bedelan kartaa tan].” Akhriskoo socda ku istaag erayada jiiibta heesta lagu jaro oo ku dhiiri geli inuu inta aad ka tagto dhamaystiro. Bar ilmahaaga heesaha-maaweelada carruurta qaarkood oo kuwada luuqeeya heesaha.
- ✔ Tusi erayada qaybta ka ah nolol maalmeedka sida erayada boorarka dibedaha laga taago oo ay wax ku qoran yihiin [sida McDonald, Pizza Hut], kuwa ku qoran bokoska xabuubka cuntada lagu keeno(sida Wheaties, Cheerios) iyo calaamadaha jidadka(sida STOP, SCHOOL)
- ✔ Bishiiba mar booqo laybareeriga[maktabada] oo la soo qaad ilmahaaga bawaag. Weydii ilmahaagu inuu kuu akhriyo sheekada uu jecelyahay.
- ✔ Ka feker inaad hadiyad u siiso ilmahaaga bawaag ama qalabka wax lagu qoro ama sawiro xilliyada dhalashooyinka iyo dhacdooyinka muhiimka ah.
- ✔ Weydii ilmahaagu inuu kuu sheego sheeko adiguna aad qorto. Ka dibna dib ugu akhri.
- ✔ Ka samee buug qoraalada ilmahaaga. Weydii inuu sameeyo sawiro raaca erayada iyo feegaarka uu sameeyo.
- ✔ Weydii macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha laybareeriga[maktabada] inay kaala taliyaan bawaagta ilmahaaga loo akhriyi karo.



Ka hor intaaney iskuulka bilaabin, xiise ayey carruurta u muujiyaan xisaabta iyo tirada. Samaynta xisaabtu waxay ka soo ifbaxdaa markay bilaabaan inay u qaybiyaan saaxiibadood oo u siyaan macmacaanada midmid, rooti laba u kala jaraan is ay walaalkood ama walaashood ula wadaagaan, koobab biyo ku kala wareejiyaan, meel kala gaara ku kala ururiyaan badhamada waaweyn iyo kuwa yaryar ama inay gacanta isku garaacaan iyagoo la raacaya erayada jiipta u dhacaya ama hees. Nolol maalmeedka joogtada ah ayaa u diyaarisa ilmaha fahamka xisaabta.

Macalinka ilmaha waxbarashada carruurta intaaney da'da dugsiga gaarin iyo waalidku waxay ku dhiiri gelin karaan xiisaha ubadka iyagoo ku kaalmaynaya ilmuhu inuu ku barto xisaabta iyadoo la adeegsanayo xaalado dhaba oo guriga iyo fasalka la xiriira iyo inay ku madadaaliyaan falalka la xiriira tirinta, qiyaasida iyo isticmaalka tirada si loo xaliyo masalooyin fudud sida lix macmacaan ah oo lala qaybsado saddex saaxiib. Carruurta fursada loo siiyo inay wax fiiriyaan, weydiyaan, ururiyaan wararka muhiimka ah, fikradahooda soo bandhigaan iyo inay la xiriiriyaan xisaabta nolol maalmeedka waxay samaystaan aasaas adaga oo ka kaalmeeya, markay iskuulka galaan, inay fahmaan fikradaha xisaabta.



Tirada, Kasida Tirada iyo Adeegsigeed

Tan waxaa looga jeedaa: *Tirada oo loo isticmaalo tirinta bilawga aha ilaa iyo waxa ku xisaabinta beensal iyo warqad, iyo ku isticmaalida qalabka casriga ee kaalkulaytarada iyo kunbuyuutarka.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Tiriyaan ilaa iyo toban iyagoo taabanaya walax kasta markay ciyaarayaan ama ay eegayaan buug tira le iyagoo waalidku ama qof kale u akhriyayo.
- Sheegaan inta walax ee ku jirta koox shan ama wax ka yar ka kooban.
- Isugu ururiyaan oo kala saraan laba kooxood oo koox kasta ay ku jiraan tira is le'eg sida xayawaankoo dhan, wixii isku midab ah ama wixii dhir ah.

Tijaabi fahamkaaga: **Samaynta Kooxo ka kooban walxo**



Samee laba urur oo ah raso halkii raso oo kastii ay tahay saddex[wadajir ahaan ah 6 raso].

- Gartaan oo kor u dhahaan tirada laga bilaabo 0 ilaa iyo 9. Bilaabaan qoritaanka iyo wareejinta tirada.
- Magcaabaan lacagaha qadaadiicda ah qaarkood(sida penny[baysteen], dime[toban centi], quarter[25 senti]) iyo inay gartaan inay yihiin xaddi kala duwan.
- Inay hore u tirin karaan(kow, laba saddex..) iyagoo isticmaalaya tirada afargeeska ama dumnada le dhibcaha la yaqaan oo tirada ku salaysan.
- Isku daraan laba urur oo walxo yaryar ka kooban si ay uga sameeyaan hal urur oo weyn. Tusaale ahaan, inuu isku daro laba raso oo saddex wax ka kooban si uu u sameeyo hal urur oo weyn oo lix wax ka kooban.



Qiyaasida

Tan waxaa looga jeedaa: *Qiyaasid sax ah oo la sameeyo iyadoo la isticmaalayo qalabka wax lagu qiyaaso sida mastaradaha[rulers] iyo koobabka wax lagu beego; afka la isticmaalo sida iinjka iyo rodolka; iyo qalabka casriga ah sida cabirayaasha iyo kaalkulayrada*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay bilaabaan aqoonsashada iyo isticmaalka luqada lagu cabiro xilliga sida maalinta, habeenka, todobaadka, shalay, maanta iyo beri.
- Inay gartaan oo isticmaalaan qalabka waqtiga lagu cabiro sida kaalandarka, saacada iyo muddeeyaha shooladaha.
- Bilaabo inuu isbarbardhigo walxooyin isagoo isticmaalaya erayada sida ka weyn, ka yar, ka culus, ka fudud, ka dheer, ka badan iyo ka yar.
- Inay qiyaasaan dhererka iyo muga(inta shaygu qaadi karo) oo u isticmaalaan walxaha caanka ku ah beegitaan.

Tijaabi fahamkaaga: Ku qiyaasida dhererka iyo muga cabirayaaal



Imisa oo ah qardhabta waraaqaha[paper clips] ayaa la mid ah dhererka qalin beensalaka? Waraaq hal qardhab ahi waa beege wax lagu cabiro. Ama imisa koob oo ciid ah ayay qaadataa in caruusad[TOY] baag ciideed ah la buuxiyo? Koobka ciida ah waxa loo isticmaalay beeg ahaan wax lagu qiyaasayo.



Jiyoomatirga iyo Kasida Isbayska

Tan waxaa looga jeedaa: *Magcow qaabab kala duwan, isugu gee koox ahaanba inta isle iyo kuwa ka duwan, markaa is barbardhiga walxahaa. Isticmaal arrimaha si aad u xalisho masalooyinka qaar*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay gartaan, beegbeegaan ama u kala soocaan walxuhu sida qaab ahaan ama xajmi ahaan ama tilmaamooyinka kale oo ay leeyihiin. Tusaale ahaan, inay isbarbardhigaan labadii iskuweeroo isku xajmi ah ama labadii kubadood oo kala xajmi ah.

Tijaabi fahamkaaga: Koox u kala soocida



Qaybo ama kooxo u kala saaraan shayada qaabka gaarka ah le ama walxa maalmeedka sida sharaabaadada[iskaalshooyinka], malqacadaha[qaadooyinka] iyo gaadhi gacameedyada iyadoo lagu salaynayo sida ilmuhu uu koox ahaan u calaamadiyo. Tusaale ahaan, weydii ilmuhu inuu dhamaan wixii iskuweer[square] ah hal koox ka dhigo iyo inuu shay kasta oo le qaab goobo uu kooxo kale ka dhigo.

- Magcow ama faahfaahi shayada saddex-qaabeedleyda[three dimensional] ah adigoo isticmaalaya luqad ilmuhu kasi karo sida walxaha qaab kubadeedka le[sphere] adigoo balooniga tusaale u qaadanaya, shayada kuyuubka[cube] ah adigoo bokoska[box] tusaale qaadanaya, iyo walxaha qaabka toobinka le[cone] adigoo jalaatada sida toobinka loo qaabeeyo[ice cream cone] oo kale tusaale u qaadanaya

Tijaabi fahamkaaga: **Walxaha laba-qaabeedka iyo saddex-qaabeedka ah**



Walxaha laba-qaabeedka ahi waxay leeyihiin laba qiyaas oo ah dherer iyo balac sida afargeeslaha lagu dul sawiro xaashida. Walxaha saddex-qaabeedka ahi waxay leeyihiin saddex cabir sida dherer, balac iyo joog sida raso carruusado[toys] ah oo lays dulsaaray.

- Bilow inaad isticmaasho luqad sharaxaysa goobta shaygu yaalo sida sare, hoose, dul, oogo, sal, guud, dibed, hore, gadaal ama dhex.



Hannaanka, Iskuxidhka iyo Aljabrada

Tan waxaa looga jeedaa: *In la tusiyo siday walxuhu midkoodba kan kale ula xiriiro iyadoo la isticmaalayo tusayaal, garaafyo iyo calaamadooyin. Isticmaal shayadaa si aad u xaliso masalooyinka qaar.*

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Kala soocaan walxaha iyagoo adeegsanaya tilmaamo keliya sida xajmiga, midabka, qaabka ama sida loo isticmaalo.
- Isku wareejiyaan, ku daraan siday u abuurato hannaan siman oo qaabaysan.

Tijaabi fahamkaaga: **Hannaan fudud**



Shay qaabkee le ayaa ku xiga? ■ ● ■ ●



Kala Dhigdhigida Warka iyo Itimaalka

Tan waxaa looga jeedaa: *Ururinta, iskudubarididada iyo macna ka soo saarka warka iyo in loo isticmaalo natiijada sidii looga jawaabi lahaa su'aalaha, loo xalili lahaa masalooyinka oo loo samayn lahaa saadaal.*

Waxay carruurto gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Sharaxaan oo u kala soocaan shayadu siday isu leeyihiin iyo siday u kala duwan yihiin.
- Ka dooran karaan tax garaaf fudud ah kan le shayada ugu badan iyo kan ugu yar.

Tusayaal iyo Falal



- ✓ La ciyaar ilmahaaga cayaaraha tirooyinka ku salaysan. Adiga iyo ilmahaagu waxaad tirin kartaan inta talaabo oo aad qaadaan marka aad jaranjaro koraysaan, wada tiriya inta tufaax ee ku jira bacda ama wada tiriya inta caruusadood[toys] ee dulsaaran mefreshka[shelf].
- ✓ U akhri ama kala sheekayso tirooyinka adigoo tirinaya bawaagta, adigoo u tilmaamay oo haddana u tirinaya shayada ku jira bog kasta.
- ✓ Ha kula tiriyo ilmahaagu lacagta sarifka ah iyo kuwa warqada ah.
- ✓ Kala hadal waqtiga, sida “Waa 11:30 oo ah xilligii qadada.” “Waa 9:30 oo ah xilligii hurdada.”
- ✓ Weydii ilmahaaga su'aalo sida “walxaha kan weyn ama yar?” ama “qofkee dheer ama gaaban?”
- ✓ Sii ilmahaaga walxo uu kala sooco oo tiriyo, sida waxyaaba kala qaab iyo midab duwan oo kutlad isle ah, xaashiyo, badhamo ama xayawaanka caagaga ka samaysan.
- ✓ Markaad socodsiiinayso ama adeeg u wado, weydii ilmahaaga inuu kuu tilmaamo walxaha isku qaabka aha iyo kuwa u samaysan qaab afar-gees ama saddex-xagal ama goobo.
- ✓ Weydii ilmahaagu inuu qiyaaso shayada guriga laga helo isagoo isticmaalaya xarig ama shay kaloo adag.
- ✓ Weydii macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha maktabada [laybareeriga] inay kuu tilmaamaan bawaagta aad u akhriyi karto ilmahaaga ee la xiriira tirada.



Carruurto waa ku dhashaan dabciga saynismada oo waxay ku sifaysan yihiin inay jecelyihiin inay waxkasta ogaadaan, eegaan oo su'aalaan. Aqoonta ay sayniska u leeyihiin wuxu ka soo dhex baxaa iskudaygooda inay macna u helaan deegaanka ku xeeran iyo inay ku xiraan waaya-arragnimooyinka cusub toodii hore. Waxay isku dayaan inay ogaadaan walxa badani siday u shaqayaan, waa tijaabiyaan, waa rogrogaan, waa faaqidaan oo waxbay su'aalaan. Firqoonida ay samaynayaan dhexdeeda ayey ku sii bartaan inay ku nastaan oo mahadiyaan waxa ku xeeran.



Sayniska Dhulka iyo Arlada

Tan waxaa looga jeedaa: *Fahamka siday kala bedelka Dhulka ka dhaca oo ah habeenkii oo maalin isu bedela ay ugu xiran yihiin hannaan ka jira caalamka sida cadceeda iyo meerayaasha kale ee hannaanka dunida*

Waxay carruurto gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay bilaabaan isticmaalka erayada sayniska sida habeenka, maalinta, cadceeda, dayaxa, xiddigaha, qabow, kulayl si ay u sharaxaan waxa ay arkaan.
- Gartaan sida xayawaanka iyo dhirtu ay deegaankooda u bedelaan sida caleenta dhirta ka daadata oo dhulka tuunshan iyo dabagaalaha godka qodoshadiisa bilaaba.
- Inuu sharaxo oo isbarbardhigo xilli isbedelka sida caleenta midabka bedelaysa, hawada qabowga ama kulaylka noqonaysa, ama ubaxa dhulka ka soo baxaya.
- Inuu isticmaalo erayo ama taswiiro uu ku sharaxayo isbedelka dhulka.



Sayniska Noolaha

Tan waxaa looga jeedaa: *Fahmida sida waxa nooli u nool yihiin, siday u wada shaqayaan iyo siday ula falgalaan dabeecadahooda.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsigaa caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Ogaadaan in waxa nooli u baahanyihiin cunto, biyo iyo hawo.
- Bilaabaan inay bartaan in sheekooyinka ku yira filimada maaweelade[cartoons] iyo filimada noocyadiisa kale marmar soo bandhigaan dhir iyo xayawaano samaynaya waxyaabo aanay dhab ahaan samayn karin sida ubax hadlaya.
- Inay bilaabaan fahamka in ilmaha xayawaanku uu caadiyan u egyahay waxa dhalay oo sidoo kale dhirta yaryari caadiyan ay egyihiin dhirta la mida oo waaweyn.
- Inay gaartaan faraqa u dhexaaya koox dad, dhir ama xoolo isku mida. Tusaala ahaan, eydu waxay isugu dhexjirtaa kuwa kala baaxad iyo midab duwan. Sidoo kale tufaaxu wuxu leeyahay midaba kala duwan.



Sayniska Muuqaalka

Tan waxaa looga jeedaa: *Ina la fahmo waxa walxuhu ka samaysan yihiin, waxay qaban karaan iyo waxaynu ku qabsan karo. Fahmintaanka fikradaha iyo tilmaamaha maatarka, tamarta, xooga iyo dhaqdhaqaaqa.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsigaa caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Tusiyaan in ashyaadu ka samaysan yihiin qaybo la isu geeyey sida in kursigu leeyahay lugo, meel lagu fariisto iyo meel lagu tiirsado.
- Isticmaalaan shanta dareeme — taabashada, urinta, arraga, dhandhanka iyo maqalka-si ay isu barbardhigaan ashyaada ka kooban wax kala duwan sida biyaha, ciida iyo looxa.
- U kala soocaan walxaha la wada yaqaan iyagoo isticmaalaya midabkooda qaabkooda, iyo inta ay le'egyihiin.

*Tijaabi fahamkaaga: **Kala soocida walxaha***



Fahamka sayniska waxa soo geli kara xajmiga, qaabka iyo midabka. Weydii ilmahaaga batanada in uu u kala saaro siday isu leeyihiin xajmi ahaan, ka dibna inta dalool ay leeyihiin, ka dibna midabkooda.

- Inuu fahmo erayada dhaqdhaqaaqa la xiriira sida sare, hoose, dheerayn, gaabin, isrogrog, boodboodid, gadaal iyo hore marka afka jiho looga tilmaamayo



Sayniska iyo Tiknoolajiga

***Tan waxaa looga jeedaa:** Fahmitaanka sida xiriirka ka dhexeeya sayniska iyo teknoolijiyada loo isticmaalo si loo xaliyo masalooyin badan.*

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Gartaan qalabka caanka oo aqoonsadaana siday dhib la'aan ugu isticmaali lahaayeen(qof ka weyn iyagoo gacan ka helaya) sida maqaska, dubaha, burushka ranjiga ama macmacaanka qalabka lagu gooyo.
- U isticmaalaan walxaha caanka ah hannaan cusub sida in waraaqaha musqulaha ay ka dhigtaan teliskoob iyo in ay qalabka wax lagu kariyo iyo malqacadaha qoriga ay u isticmaalaan sidii qalab muusiga lagtu tunto.



Isweydiin Cilmiyeysan

***Tan waxaa looga jeedaa:** Isticmaalida hannaan cilmiyeysan si su'aala loo weydiyo, dib loo derso, ama loo ururiyo, la kala dhigdhigo oo loo gudbiyo warka.*

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Weydiinta su'aalo, sida maxaa dhici kara haddii[what if], oo ku saabsan walxaha.

- Inay bilaabaan isbarbardhigida walxaha ama shayada nool iyagoo u eegaya siday isugu egyihiin ama u kala duwan yihiin.
- Inay ku sheegaan wixii loo fiirsado waxa ka soo baxa tasaawiir inay ku sawiraan amo sheeka ku soo gudbiyaan.



Hanaanka Cilmiyeysan oo Wax loo Ogaan Karo

Tan waxaa looga jeedaa: *Barashada sidii loogu fekeri lahaa si cilmiyeysan iyo sidii loo fahmi lahaa sidii ay dadku u qaabayaan barashada iyo isticmaalida sayniska.*

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsi caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Ka soo jeediyaan fekrado iyo sharaxyo waxay u fiirsadaan, sida sababta uu berefku u milmo, iyagoo taswiiraya, ka hadlaya oo muujiniya (iyagoo qof ka weyni gacan siinayo).
- Kala gartaan faraqa u dhexeeya falalka kaalmeeya ama dhiba waxa noola.
- Ka qayb qaataan tijaaboyinka sida kuwa lagu fiiriniya sheyada kuwooda sabeeya iyo kuwa dega baaldi biya ku jiraan dhexdiisa.

Tusayaal iyo Falal



- ✔ Waqti sii sidii aad uga jawaabi lahayd su'aalaha ilmahaagu ku weydiiyo ee la xiriira dabecada iyo siday wax u koraan ama isu bedelaan. Ula marmar si aayara dibedaha ilmahaaga. Weydii inay dhegeystaan cododka ku xeeran. Sharax oo qor waxa ay maqlaan.
- ✔ Booqasho ugu kaxee carruurtaada matxafka[muusiyamka] carruuraha, goobaha dabiiciga ah, jardiinooyinka, dukaamada cuntada iyo ubaxa. Ka hadal waxa ilmahaagu bartay iyo waxa aad aragtay.
- ✔ La beer carruurtaada dhir ubaxa ama khudaara. Ka hadal oo u muuji isbedelka ku dhacaya.
- ✔ Ku ciyaari "I SPY" adigoo u sharaxaya shay oo markaa ilmahaaga weydiinaya inuu maleeyo waxa aad arragto.
- ✔ Akhri bawaagta ku saabsan qoysaska xayawaanka. Ka hadal oo ku taageer ilmahaagu inuu garto xayawaanka koray iyo kuwa yaryara oo ay wataan sida dibiga iyo weysha ama qoolayda weyn iyo tan yaryar.
- ✔ U keen ilmahaaga baaquliyo yaryar si uu ugu guro dhagaxyada iyo cayayaanka. U calaamadi baaquli kasta si uu waxbarasha ahaan ugu isticmaalo.
- ✔ Kala hadal oo tus ilmahaaga siday shayadu u shaqayaan sida in baytari ay u baahan yihiin caruusadaha iyo toojajku, ama sida dabayl loogu baahan yahay sidii abuuatay[kite] loo duulsiin lahaa.
- ✔ U ogolow in ilmahaagu uu dhadhamiyo, uriyo ama dareemo waxyaabaha cuntada laga diyaariyo ka hor intaan la karin iyo ka dib. Kala faalootan isbedelkooda.
- ✔ Weydii macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha laybareeriga[maktabada] inay kaa tala siiyaan bawaagta sayniska ku saabsan oo aad u akhriyi kartid ilmahaaga.



Cilmiga bulshadu wuxu ardayda baraa siday dadku u nool yihiin, shaqayaan, isula noolaadaan, dhibka u xaliyaan, wax uga bedelaan adduunkooda iyo sida adduunku iyaga u bedelo. Carruurta yaryarka waxa siiya waaya-arragnimada u horaysa oo ay ku bilaabaan barashada cilmiga bulshada qoyska, iskuulka, deriska iyo xaafada.

Inta aanay da'dii dugsiga gaarin, boorarka lagu ciyaaro ayaa carruurta ka kaalmaya fahmida sharciga ka qaybgalka[dad-la-dhaqmida], halka adkaanta dul marka wadada saddexda xarriiqoodii ay barto fekradaha iyo xirfadaha maabaynta[Juquraafiga]. Carruurta waxay xilliga[waqtiga] ka bartaan falka maalin kasta u joojtada ah ee soo noqnoqda-sida sheekada loo sheego hurdada ka hor, dibeda lagu ciyaarsiiyo qadada ka dib. Meel ciyaar loogu talagalay marka sidii dukaan khudaarta iyo cuntada iibiya oo kale loo sameeyo, carruurta waxay sii baari karaan fekradaha shaqada iyo iibsiga iyo gadida(dhaqaalaha). Cilmiga bulshada waxyaabaha ku jira waa mawduuc laga heli karo bawaag iyo gabaya badan oo dhalinyarada loogu talagalay.



Taariikhda

Tan waxaa looga jeedaa: Fahmida arrimihii dhacay xilli hore.

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay bilaabaan isticmaalka erayada sharaxaya waqtiga sida maalin, habeen, shalay, maanta iyo beri.
- Ku calaamadsadaan maalmaha waxa dhacaya maalintaa sida maalinta iskuulka, maalmaha-nasashada, maalmaha dhalashada iyo maalmaha fasaxa.
- Inay karaan sheegida wixii dhacay markay yaraayeen.

Tijaabi fahamkaaga: Xusuusashada dhacdooyinkii tegay.



Sawirada wadajir u wada eega. Sawirada qoyska, oo adiga iyo ilmahaaga ku tusinaya, oo da' kala duwan ah ayaa ugu wanaagsan eegidooda. Weydii ilmahaagu waxa uu ka xusuusto sawiradaa?

- La wadaag sheekooyinka gaarka ah ee qoyska iyo dhaqanka-sida “Markii aan da'ada yaraa...”, “Markii awoowe ahaa wiilka....”



Dadka Bulshadu ka Kooban Tahay

Tan waxaa looga jeedaa: *Aqoonsashada sida ay dadku isugu midka yihiin iyo siday u kala duwan yihiin iyadoo laga eegayo muusikada ay jecel yihiin, cuntada ay cunaan, meeshay ku nool yihiin iyo waxyaabihii soo maray qoyskooda oo ay jecelyihiin.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyadoo uu hagayo qof ka weyni:

- Garan karaan habka ay uga mid noqon karaan kooxo kala duwan-qoyska, saaxiibada, fasalka dugsiga ilmaha, wiilal iyo gabdho.
- Isticmaalo sheekooyinka, sheeko-xarriirada, muusikada iyo farsama-gacmeedyo si uu u barto dhaqanka iyo caadooyinka dalalka kale.



Juquraafiga

Tan waxaa looga jeedaa: *Aqoonsashada goobta ay guriga, iksuulka iyo jardiinada ku yaaliin. Fahamka sida ay meela kala duwan ay wadooyinku isugu xiraan sida tan la maro min guriga ilaa jardiinada iyo siday ku noolaashaha meeshaasi waqtiga isula bedesho.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyadoo uu hagayo qof ka weyni:

- Inay isticmaalaan erayda sharaxa goobaha sida sare ama hoos, kor iyo hoos, halka ama halkaa, hore iyo gadaal.
- Inay sheegi karaan cinwaanka guriga kolka la weydiiyo.
- Yaqaaniin sida loogu warwareegi karo meelaha uu yaqaan sida guriga, deriska, ama dugsiga ilmaha(laakiin waa in qof ka weyni kaalmeeyaa).

- Ka warami karaan meelaha u dhow guriga sida wadooyinka, guryaha kale, cuunka[meesha dhirta badan], dooxooyinka iyo beeraha nasashada iyagoo qof weyni la socdo.
- Sheegaan sida ilaha dabiiciga ah loo isticmaalo sida biyaha oo la cabo ama lagu qubaysto, ama ciida dhooqada ah oo loo isticmaalo talaalida ubaxa iyo beeraha.



Dhaqaalaha

Tan waxaa looga jeedaa: *Barashada waxaan u baahanahay iyo waxaan rabno waxay ku kala duwan yihiin, ciday inooga yimaadaan waxyaabahaasi iyo adeegooda[waxsoosaarayaasha] iyo cida ay yihiin kuw iibsada ama isticmaala[manaafacaadsadayaasha].*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Gartaan in dadku leeyihiin waxyaaba badan oo doonid ku salaysan iyo waxyaaba badan oo rabitaan sal ku leh.
- Inay bartaan siday ugu heli lahaayeen waxay rabaan hab la aqbali karo sida wadaaga alaabada, markooday wax qaataan iyo iyagoo alaabooyinka si siman isugu bedelanaya.
- Inay ku fahmaan fekradaha ah keenida alaabada iyo adeega iyo isticmaalka alaabada iyo adeega falalka ay samayaan sida iyagoo metelaya ciyaar ah dukaan hayn iyo socdaal aqooneed loo geeyo meelaha beeraha.

Tijaabi fahamkaaga: Alaabada iyo Adeega

Alaabada: Waxyaabaha aad iibsato sida cuntada, dharka iyo caruusadaha

Adeega: Hawlaha aad qof lacag ku siiso inuu kuu sameeyo sida tima jarida, gaari hagaajinta iyo carruur haynta.





Dawlada

Tan waxaa looga jeedaa: Fahmida sida ay dawladu inoo kaalmayso iyo siday u shaqayso.

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay ku jiraan dhamaadka sanadaha dugsiga caadiga ah intaanay bilaabin, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Garashada dadka waaweyn ee bixiya caawimida iyo dhaqaalaynta sida waalidka, macalimiinta iyo askarta.
- Gartaan calanka Maraykaanka inuu yahay calaamada dawladeena.
- Fahmayaan baahida loo qabo sharciyada fasalka[galaaska] dhexdiisa iyo sababta ay u tahay lagama maarmaan in la raaco.



Tijaabi fahamkaaga: Sharciga Muhiimadiisa



Kala sheekayso ilmahaaga sharciyada, sida sharciga wadooyinka iyo sharciga badbaadada ee la xiriira goobaha lagu dabaasho iyo beeraha lagu nasto. Kala hadal waxa dhici lahaa haddii aanay jireen wax sharci ahi ama aan la raaceen sharciyada la dejiyey



Xaqa Wadaninimada iyo Xilkiisa

Tan waxaa looga jeedaa: In loo diyaariyo siday u noqon lahaayeen muwaadiniin hawlkar iyo xilkasnimo isku darsaday

Waxay carruurtu gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsiga caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- Wada qabtaan hawlaha fasalada dhexdooda ka socda iyo kuwa gurigaba iyagoo kaalmaynaya, markooda waxqabanaya iyo inay wax la qaybsadaan inta kale.
- Bartaan sidii muranka dhexmara iyaga iyo carruurta kale wada hadal loogu dhamayn lahaa.
- Tusiyaan inay wax kala dooran karaan oo qorshe fulin karaan.

- Fahmaan cirib-dabeedka ka iman kara doorashooyinka la sameeyo. Tusaale ahaan, sida in la ururiyo carruusadaha[toys] daadsan in ay guriga ka dhigto mid wax lagu kufo ama jabo aanay oolin iyo inay ka jiraan inay carruusaduhu jabaan.



Barashada Xirfadaha Bulshada iyo Hannaankooda

Tan waxaa looga jeedaa: *Ururinta macluumaadka, habayntooda iyo u isticmaalkooda in go'aan lagu gaaro.*

Waxay carruurta gartaan oo qaban karaan marka ay gelayaan da'dii dugsi caadiga ah ay ku bilaabi lahaayeen, iyagoo uu hagayo qof ka weyni:

- U dhegaystaan war ahaan marka ay inta kale ka hadlayaan buugaagta, sheekooyinka iyo waxyaaba dhacay.
- Bilaabaan samaynta saadaalin[qaybta soo socota ee sheekadu siday noqon karto] ka dib markay dhegeystaan oo ka waramaan sheekooyinka iyo dhacdooyinka.
- La wadaagaan wararka iyagoo ka hadlaya, tasaawiir ku sawiraya ama jilaya fekradaha.



Tusayaal iyo Falal



- ✓ Isticmaal kaalandarka qoyska sidii aad u qorshayn lahayd oo ugala hadli lahayd maalmaha iskuulka, maalmaha todobaadkiiba la nasto[weekends] iyo maalmaha gaarka ah. Calaamadi oo kala hadal maalmaha gaarka ah oo ku yaal kaalandarka[jadwalka bilaha sanadku ku yaaliin].
- ✓ La wadaag kuwa kale sheekooyinka la xiriira markii ilmahaagu ahaa canug iyo socod barad, iyo sidoo kale sheekooyinka markaad ahayd adigu ilmaha. Waxaa kaloo la wadaagtaa sawirada markuu ilmahaagu yaraa oo ka waran siduu hadda isu bedelay.
- ✓ U akhri ilmahaaga wargeysyada iyo jaraa'idka oo tus tasaawiirta iyo sawirada dhulal kala duwan sida buuraha, togaga, dooxooyinka, lama-degaanka iyo kaymaha.
- ✓ La fiiri cirka habeenkii saddex cawo oo isku xigga. Kala hadal waxa aad arragto sida darruuraha, dayaxa iyo xiddigaha. Kala hadal kuwa kala duwan iyo kuwa isku midka ah.
- ✓ Markaad socdaal u kaxaynayso, ka tus ilmaha khariidada jidka aad qaadi doontaan. U tilmaan calaamadaha u taagan waxyaabaha aad ku arki doontaan socdaalka. Weydii ilmaha inuu sawiro maabka socdaalkiina.
- ✓ Ku amaan ilmahaaga markuu doorasho wanaagsan la yimaado, sida inuu la wadaago wax inta kale ama cid hawl kala qayb galo, adigoo oranaya tusaale ahaan “Aad baan u jecelaystay sida aad carrusadahaagii ula wadaagtay Susie.”
- ✓ Kala hadal caadada iyo dhaqanka qoyska soo mara sanadkii sida habka loogu dabaaldego dhalashooyinka, Ciidaha iyo fasaxyada gaarka ah, fasaxa caadiga ah iyo xilliga waalidka loo tago.
- ✓ Weydii macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha laybareeriga[maktabada] inay kaa tala siiyaan bawaagta aad ilmahaaga u akhriyi kartid ee ku saabsan siday ciyaalku ugu nool yihiin dalalka kale iyo siday qoysasku u wada nool yihiin oo u wada ciyaaraan.



25 South Front Street
Columbus, Ohio 43215-4183
1-(877)-OHIOEDU

The Ohio Department of Education does not discriminate on the basis of race, color, national origin, sex, religion, age or disability in employment or the provision of services.

This guide was funded by the U.S. Department of Health and Human Services Head Start Collaborative Project (05CD009/03)